

“Iyo maylasha ay tahay in aan qabto kahor inta aanan seexan, iyo maylasha ay tahay in aan qabto kahor inta aanan seexan...”

Gabayaaga caanka ah ee reer Vermont ee Robert Frost waxa uu qoray ku dhawaan 100 sano kahor kalmadahan, waxaana ay weli u yihiin sharaxaad habboon xaalada dadka reer Vermont –**gaar ahaan kuwa leh caruurta ama dadka dhalinyarta ah ee baahiyaha caafimaadka gaarka ah qaba**–ay dareemaan wakhtiyadan aanay xaaladu deganayn. Waxaa adag in la aamino in ilaa hal bil kahor Badhasaab Phil Scott uu ku dhawaaqay xaalad degdeg ah oo gobolka ah, in kasta oo jidku dheer yahay, waxaa cajiib ahayd in la arko qaababka la yaabka leh ee dadka reer Vermont ay iyaga oo aan nasan uga shaqaynayaan sidii midba midka kale u taageeri lahaa. Diiradda la saarayo shaqadayada halkan CSHN waxa ay sii ahaanaysaa laba qaybood: taas oo lagaga jawaabayo safmarka iyo sidoo kalena lagu taageerayo **qoysaskeena**. Inta ay maylashu ay fidsan yihiin horteena, waxa aanu kaa doonaynaa in aad ogaato in **halkan aanu adiga kuu joogno**, lana heli karo, oo aynu ka wada gudbi doono xaaladan.

#### Qodobada Muhiimka ah

- **Children’s Personal Care Services:** 10<sup>ka</sup> Abriil, wax ka badan 60 qosas, shaqaalaha CSHN, shuraakada bulshada ayaa iskugu yimid qaab onlayn ah 'Hoolka Magaalada' si ay uga wada hadlaan is badalada ku meelgaadhka ah ee CPCS. Adam Poulin, Maamulaha Barnaamijka CPCS, waxa uu qoysaska u dul maray isbadalada nidaamyada waxana uu uga jawaabay su'aalahooda.
  - **Miyaad ka maqnayn shirkii Hoolka Magaalada?** Asxaabteena Dalada Qoyska Vermont ayaa soo geliyay [recording](#).
  - **Akhri waraaqda tilmaamaha CPCS:** waxaa laga heli karaa [CPCS guidance document](#) .

#### Khayraadka

##### Vermont Medicaid:

- Vermont waxay si kumeel gaadh ah u dhaafi doontaa [Dr. Dynasaur](#) kharashka caymiska, taas oo dhaqan gashay 1 dii Abriil, 2020.
- Iyada oo uu dhaqan galayo 1 Maarso, 2020 dhamaan kharashaadka hordhaca ah ee adeegyada bukaan socodka isbitaalka waa laga dhaafay inta lagu jiro Xaalada Degdega ah.

**Kaalmada Sharciga VT:** [legal and benefits updates for Vermonters](#).

#### Nala Hadal

- Shaqaalaha ku sugan [CSHN](#) waxaa ka go'an inay kula socodsiiyaan khayraadka iyo macluumaadka ugu danbeeya ee adeegyada qoyskaaga khuseyn kara. In kasta oo booqashada shakhsi ahaaneed wakhti xaadirkan la hakiyay, waxa kaliya ina kala xigaa waa taleefan ama email.
- Waxa aad qabataa websaytkayaga si aad u hesho [CSHN Care Coordinator](#) maxalliga ah ama nagala soo hadal 802-863-7338.
- Maxaa kale ee ku jiri kara wargayskan? Waxaan rabnaa in aan wax ka maqalno [you!](#)

Hel macluumaadka dhamaan cusboonaysiintayada [www.healthvermont.gov/family/special-health-needs](http://www.healthvermont.gov/family/special-health-needs).